

JIDKA 48

Qorshaynta shabakad gaadiid lala qabsan karo oo adkaysi leh

Laga bilaabo Agoosto 22, Metro Transit waxay soo bilaabi doontaa Jidka 48, oo ah jid cusub oo u adeeg deegaanka. Jidkan cusub waxay dhameystiri doontaa Jidka 14 ee hadda jira, iyadoo dadka raacaya siin doonta fursado badan oo gaadiid ah. Jidka 48 waxay beddeli doonaan jidadka 14D iyo 14G iyadoo isku xiraysa Robbinsdale, Crystal, Golden Valley, waqooyiga Minneapolis, iyo faras-magaalada Minneapolis.

Waa maxay Jidka 48?

- Jidka 48 waa jid cusub oo ay maraan gaadiidka deegaanka kuwaas oo u socda faras-magaalada iyadoo la sii marayo Penn Ave., Glenwood Ave., 7th & 8th streets, iyo 4th & 5th avenues ee isku xiraysa Robbinsdale, Crystal, Golden Valley, waqooyiga Minneapolis, iyo faras-magaalada Minneapolis.
- Macaamiisha jidka 48 waxay ku xidhi karaan jidadka kale oo ku yaala Robbinsdale Transit Center, Gateway Transit Center, iyo Ramp A/5th Street Transit Center, iyo leemanka Buluuga, Cagaarka, iyo E ee METRO ee mara Hennepin Ave. iyo sidoo kale leemanka C iyo D ee mara 7th St./8th St.; Leenka Oranjiga ee mara Marquette Ave./2nd Ave.; Jidka 14 (u safra waqooyiga) ee 7th St. faras-magaalada iyo Jidka 14 (u safra koonfurta) ee 5th Ave. & 6th St.
- Macaamiisha isticmaala wadadan waxay arki doonaan horumarin ay ku jiraan dhagxaha la hoos dhigo gaadiidka si ay dadka si fudud ugu fuulaan gaadiidka, hoy cusub oo ku yaal joogsiyo gaar ah, iyo joogsiyo nidaamsan guud ahaan.
- Marka la gaaro sannadka 2027, Balaarinta Leenka Cagaaran ee METRO waxay kaga xidhi doontaa Jidka 48 sidoo kale Boosteejada Royalston Ave./Suuqa Beeralayda barta Glenwood Ave.
- Jidka 48aad waxay isticmaali doontaa bas caadi ah oo 40 fiid ah. Maalmaha shaqada, 5 a.m. ilaa iyo saqda dhexe. Sabti/Axad, 7 a.m. ilaa iyo saqda dhexe. Nawli \$2.

Maxaa lagu samayn doona Jidka 14?

- Abuuritaanka Jidka 48 waxay nidaamin doontaa Jidka 14, taasoo ka dhigaysa mid dhakhso badan oo la isku halayn karo.
- Jidadka hadda jira ee 14D, 14G, iyo 14N meesha waa laga saari doonaa. Adeeg kale ayaa laga heli doonaa Jidka 48.
- Safarrada aan dugsiga lagu aadaynin iyadoo la isticmaalaya Jidka 14E meesha waa laga saari doonaa.

Khariidadda Jidka 48 waxay ku qoran tahay bogga dambe.



La soco wararkii ugu dambeeyay adigoo iska diiwaan gelinaya akhbaaraadka aan ku soo dirno iimaylka.

Naga soo wac: 612-373-3333

Erik Thompson, Isuduwaha Wacyigelinta Bulshada

erik.thompson@metrotransit.org

2

- Jidka 48
- Joogsi bas

Four Seasons Apartments
Douglas Terrace Apartments
32nd Ave

